Cudur Daaweynta iyo Hawlaha laga qabto

De Evenaar
Xarunta ama Meesha qaabilsan dadka dhaqamada kala duwan ee qaba cudurada maskaxda ku dhaca ee Waqooyiga-Nederland

Datum: 22-02-2010
Copyright 1998 -2010, GGZ Drenthe, Assen (NL). Deze informatie is afkomstig van www.ggzdrenthe.nl/evenaar

Daaweyn iyo hawlgalo
De Evenaar, meesha dadka ajnebiga dhaqamada kala duwan ee qaba cudurada ku dhaca madaxs (Psychiatrie), waxay daryeel ah xaga daweynta cudurada ku dhaca madaxa siisaa dadka ajnebiga ah ee dhibaataysan iyagoo weliba dhibaatadaa u sii raacsan tahay khalkhal ama laqabsi la'aan uga timid faraqa u dhexeeya dhaqankoodii iyo kan Nederland.

Warbixintan waxaad ka akhrisan kartaa habab badan oo dadka loo daaweeyo iyo hawlgalada la qabto ee ka mid noqon kara dhinacyada kala duwan ee dadka loogu daaweeyo de Evenaar.wax badan oo ku saabsan waxa kagu qabto De Evenaar.

Cudur daaweynta howsha la qabanayo (Activiteitentherapie)
Wakhtiga daaweeyntan waxaa la isticmaalo waxyaabo ama qalabyo kala duwan sida dhar ama marooyin, qoryo ama alwaax, warqado ama waraaqo. Mashquulida aad hawl ama wax ku mashquulsantahay waxay kuu noqonaysaa wax kaa jeediya wixii ku dhibayay. Cudur daaweynta howsha la qabanayo waxay kaloo kaa caawin kartaa ama kordihin/badin kartaa fiirsashada wax laga fiirsado(de concentratie) iyo kalsoonidaada. Waxaa kaloo wakhti la siin karaa helida ama raadinta waxyaabo aad maalinta oo dhan isku mashquulisid sida shaqo lacag la'aan ah (vrijwilligerswerk) ama waxbarasho (scholing).

Daaweeynta fikrada balaaran ama fiican (Creatieve therapie)
Tani waa mid lagu daaweeynayo iyadoo la kaashanayo khibradaada ama wixii aad lasoo kulantay oo hadal looma baahna ee howl ama farsamo gacan ayaa la qabanaya. Waxay u qaybsantaa ama jira laba nooc:

- *Daaweeynta iyadoo la isticmaalayo wax sawirid*

Wakhtiga ay daaweeyntani socoto waxaa la isticmaalayaa qalabo ay ka mid yihiin rinji, qalin qori, warqad ama xaanshiyo iyo jeesto ama tamaashiirta wax lagu dhigo/qoro kuwaas oo ku siinaya jaanis ama wakhti aad wax ku sawirtid ama ku qortid adoo sawiraya ama qoraya waxa adiga kuu muhiim ah. Sidan darteed ayaa markaa dareemada ay ka midka yihiin xumaanta/niyadjabka ama farxada si fiican loo garan ama arki karaa ama ay u soo bixi karaan oo la cadayn karaa ama laga dhigi karaa wax la taaban karo.

- *Daaweeynta Matalaada/Riwaayada*

Noocan daaweeynta ah waxaa la isticmaalayaa wax kastoo ku lug leh ama ku shaqo leh riwaayad ama matalaad iyo tiyaatarka. Tusaale ahaan jilida, alifida, xitaa qoritaanka, sameeynta ama tolida dharka riwaayda lagu dhigo. Sidan darteed waxaa markaa la metalayaa dareemo kala duwan oo si wax run ah qofku u dareemi karo iyadoon hadal badan loo baahnayn.

Casharka Dadka iyo Dhaqanka
Tani waa isku imaansho leh qaabka dad wada fadhiya oo ka wada hadlaya marka arin ama xiisad ku saabsan dhaqanka. Casharkani wuxuu kaa caawin kara amaba kaa caawinayaa inaad si fiican ama fudud ula qabsatid ama u fahantid dhaqanka dhajka (Nederlandse cultuur). Ujeedo kale oo muhiim ah oo la rabo in casharkani keeno waxa weeye inaad si fiican ama wanaagsan aad uga fekertid waxyaabaha uu ku fiican yahay dhaqankaagu.

Datum: 22-02-2010
Copyright 1998 -2010, GGZ Drenthe, Assen (NL). Deze informatie is afkomstig van www.ggzdrenthe.nl/evenaar

Daawosiin
Xarunta de Evenaar waxaa kaloo badanaa laga bilaabay in dadka iyadoo dawooyin la isticmaalayo la daweeyo. Dhakhtarka cudurada maskaxda (psychiater) ayaa masuul ka ah qoritaanka ama siinta dawooyinka. Dawooyinka waxaad kasoo qaadanaysaa farmashiigaaga (apotheek).

Qaybta casharka ee Jirka iyo Naxdinta
Deze module wordt op indicatie aangeboden aan mensen die een zeer slechte conditie en veel lichamelijke klachten hebben ten gevolge van langdurige stress. In de module 'Lichaam en Stress' wordt gewerkt aan het verbeteren van de algemene lichamelijke conditie en het beter leren signaleren van en omgaan met lichamelijke spanningsklachten.

Luqada Nederland
Hadii la arko ama dareemo in loo baahan yahay waxaa la siin karaa qofka casharo ah luqada Nederaland oo ay bixinaysao macalimad ka socota GGZ Drenthe. Tusaale ahaan hadii qofka kalyantiga ama macmiisha ahi uuna si fiican ula socon karin ama u fahmi karin daaweeynta ama habka looga caawinayo waxyaabaha haya ee uu ka cabanayo.

Daaweeynta Dhaqdhaqaaqa iyo Dareenka Jirka (PMT)
Daaweeyntan waxaay tahay mid loogu talagalay dhaqdhaqaaqa iyo dareenka jirka. Deze therapie gaat om het bewegen en ervaren van het lichaam. Daaweeyntan (De PMT) waxaa badanaa lagu qabtaa goobaha ciyaarta (sportzaal). Hadii mudo dheer aan wax dhaqdhaqaaq ahba la sameyn ama wax aad u yar markaas dhaqdhaqaaqu wuxuu kuu noqonayaa wax fiican oo jirkaaga debciya oo la dareemi kari sida qof fudfudud. Waxay tahay wax fiicnaan kara hadii la qashadao ama la qaato dharka isboortiga.

Waxbarasgada xiriirka ka dhexeeya jirka iyo maskaxda
Warbixinta ku saabsan xanuunada maskaxda iyo jirka iyo xiriirka ka dhexeeya maskaxda iyo jirka waa qayb kamida waxbarashadan (Psycho-Soma-Educatie). Daaweeyntan waxaa looga hadlaa ama lagu bartaa waxyaabo ay ka mid yihiin hurdada, naxdinta iyo isdejinta, waxa xun ee kugu dhaca iyo sidii aad ula dhaqmi lahayd ama u xalin lahayd. Ujeedaduna waa sidii aad u krdhin lahayd ama u kororsan lahayd aqoonta aad u leedahay waxyaabaha ku dhibaya ama meelaha ku xanuunaya.

Daaweeynta maskaxda / hadaldaaweeynta
Daaweeyntani waxay sameeya hadii loo baahan yahay dhakhtarka maskax xanuunka daaweeya ama kan dadka maskax xanuunka qaba la hadla ee la taliya. Siyaabo kale duwan oo hadal ku dhisan ayaa daaweeyntan loo isticmaalaa.

Daaweeynta shakhsiga
Daaweeynta shakhsiga ah (systeemtherapie) maaha mid qofka kalyantiga ama qofka macmiisha ah oo qura ama keliya mashquul lagu yahay ama lagu fekero ee xitaa faamilkiisa ama reerkiisa ama qoyskiisa, iyo xiriirka kalyantiga iyo dadka ka mida faamilkiisa ayaa mashquul lagu noqdaa si wixii jira loo ogaado. Waxaa badanaa dhacda hadii qof reer ka mid ahi uu jirado ama xanuunsadao in isla markaas dad kaloo reerkaasi kamid ahi ay iyana xanuunkaasi dareemaan ama uu ku dhaco.

Datum: 22-02-2010
Copyright 1998 -2010, GGZ Drenthe, Assen (NL). Deze informatie is afkomstig van www.ggzdrenthe.nl/evenaar

Markaas si wadajir ah oo loo dhan yahay ayaa loo raadiyaa daaaweeyn iyagoo dadka xanuunka qabaa ay is weheshanayaan oo markaas mid waliba uu helo xoog badab oo uu kula dagaalamo dhibaatada haysata maadaama aanu keligiis dareemayn.

Caawinta guud

Marka la bilaabi daaweeynta ayaa waxaa kaloo la bilaabi karaa ka fekerida iyo howlaha ku saabsan meesha ama aqalka aad ku nooshay. Waxaa markaa la baarayaa oo la ogaanaya sida aad ugu qanacsan tahay waxa aad hada ama iminka maalin kasta samaysid ama sida aad maalinta u dhamaysid. Waxbarasho kastoo aad soo baratay ama wixii aad xirfad u leedahay ama ku fiican tahay iyo wixii aad ku xun tahay ayaa si cad loo dersayaa oo meel lagu qorayaa. Intaas kadib ayaa laguu sameeynayaa daaweeyn aad awoodi kartid inaad maalinta ku dhamaysid. Halkaas kadib ayaa la bilaabi karaa in lala shaqeeyo kooxo banaanka ah oo ku caawiya tusaale ahaan qof ama xafiis kaa caawiya sidaad shaqo ugu noqon lahayd hadii aad shaqeyn jirtay, ama ururka qaabilsan qaxootiga ama qof qaabilsan dhaqanka iyo bulshada.

Datum: 22-02-2010
Copyright 1998 -2010, GGZ Drenthe, Assen (NL). Deze informatie is afkomstig van www.ggzdrenthe.nl/evenaar

GGZ Drenthe
De Evenaar
Centrum voor Transculturele Psychiatrie
Altingerweg 1
9411 RA Beilen
Postbus 30000
9410 RA Beilen
Telefoon (0593) 53 58 42
Fax (0593) 53 58 51
E-mail: deevenaar@ggzdrenthe.nl

De Evenaar wuxuu ku yaalaa daarta ama sarta de Weijerd. Macaamiisha ama kalyantiga imanaya marka ugu horeeysa waa inay iska soo qoraan ama iska soo xaadiriyaan sekrataariyada xaafiska halka laga soo galo sarta ku dhegan ee la yiraahdo de Etstoel fadhida.

www.ggzdrenthe.nl

Wat doet GGZ Drenthe? Maxay qabataa GGZ Drenthe?

GGZ Drenthe waxay siisaa ama bixisaa caawimaad xaga caafimadka madaxa ah oo ay ka mid yihiin in lagugu daweeyo meeshooda ama qof laguu soo diro ama meelo kale laguu gudbiyo. Daaweeynta arimaha madaxa waxay ka bixiyaan 3 meelood ama qaybood oo wadanka ku kala yala oo kala ah: Noord-Drenthe, Zuidoost-Drenthe en Zuidwest-Drenthe.
Daarnaast biedt GGZ Drenthe klinische en ambulante forensische psychiatrie.

Xanaaneynta iyo daryeelka dad waaweyn waxaa lagu bixiyaa ama laga bixiyaa 2 ah aqalada dadka waaweyn lagu xanaaneeyo (kuwa laysku daweeyo) iyo laba aqal oo dadka waaweyn lagu hayo (kuwa lagu nool yahay) ama daryeelo.

Ka hortegida, caawimaadka xaga bulshada iyo caawimaadka xaga caafimaadku waxay ka mid yihiin arimaha muhiimka ah ee ay GGZ Drenthe. GGZ Drenthe waxay kaloo bixisaa waxbarasho ama tababaro aad u badan sida tababarida dhakhtarka cudurada madaxa(psychiater), taliyaha caafimaadka (gezondheidszorgpsycholoog), taliyaha isdaaweynta (klinisch psycholoog), kalkaalisada caafimaadka (verpleegkundige) iyo daryeelayaal.

Bij GGZ Drenthe waxaa ka shaqeeya ilaa 3000 oo qof, oo loo kala qaybiyay xafiisyadeeda ama laamaheeda kuwaas oo aad u badan oo ku yaala Drenthe. Sanadkasta waxaa caawimaad na soo waydiista in ka badan 15000 oo qof.

© 2006 GGZ Drenthe, Assen, NL. ZW.025P (11/06)
De auteursrechten van alle tekst- en beeldmateriaal in deze uitgave berusten bij GGZ Drenthe en zijn wettelijk beschermd. Gehele of gedeeltelijke overname, in welke vorm dan ook, is alléén toegestaan na voorafgaande schriftelijke toestemming van GGZ Drenthe. Neem hierover contact op met de afdeling Communicatie.

Datum: 22-02-2010
Copyright 1998 -2010, GGZ Drenthe, Assen (NL). Deze informatie is afkomstig van www.ggzdrenthe.nl/evenaar